



Magaallada Winooski

Magaallada Fursada ee Vermont

27 West Allen Street
Winooski Vermont 05404
802 655 6410
winooski.vt.gov

Isbadelka Axdiga ee ay soo Jeediyeen Codbixiyaasha ee Guri Ka saarida Cadaalada ah

Xaashida xaqiiqada

Guudmar: Codbixiyaasha ayaa codsaday in magaalladu badesho axdigeeda. Isbadelkaan ayaa u sahlaaya Dawlada Hoose ee Magaallada Winooski inay dhaqan geliso sharciga Guri Ka saarida Cadaallada ah. Dadka deegaanka ayaa u codayn kara arintaan doorashada Maalinta Kulanka Magaallada oo dhacaaya Maarso 7, 2023. Gobalka ayaa sidoo kale u baahan doona inuu aqbalo isbadelkaan. Dawlada Hoose ayaa intaas kadib u baahan doonta inay go'aansato inay abuurto sharciga Guri Ka saarista Cadaalada ah. Xaashidaan xogta ayaa xog ka bixinaysa hanaanka iyo jadwalka. Waxay sidoo kale muujinaysaa qoraalka buuxa ee isbadelka axdiga ee ay soo jeediyeen codbixiyaashu.

Booqo webseedka: winooski.vt.gov/justcause

Wac ama iimeel u dir si aad su'aalo u weydiiso: 802 655 6410 / justcause@winooski.vt.gov

La wadaag fikradahaaga dadka waynaha inta lagu jiro kulannada, kuwaasoo u furan uuna bilaash uga qaybgeli karo qof kasta:

Khamiista, Janaayo 26, 2023

6 PM laguna qaban doono Winooski City Hall (27 West Allen Street)

Ka qaybgal oonlaynka: us06web.zoom.us/j/84364849328

Kaga qaybgal taleefanka: 1 646 558 8656

Aqoonsiga Tababarka oonlaynka ah: 843 6484 9328


Sabtida, Febraayo 4, 2023

11 AM laguna qaban doono Xarunta Bulshada ee O'Brien (Toos keliya looga qaybgeli kara)

Xog ku aadan Isbadellada Axdiga

Axdiga magaallada ayaa xeerar u samaynaaya sida dawlada hoose u shaqaynayso iyo sida ay u hawlgalayso. Sharciga Vermont ayaa u ogolaanaaya codbixiyaasha magaallada inay soo jeediyaan isbadello lagu sameeyo axdiga magaallada. Haddii 5 boqolkiiba codbixiyaasha magaalladu ay saxiixaan soo jeedin lagu badelaayo axdiga, magaallada ayaa ku daraysa isbadelka lasoo jeedshay doorashooyinkeeda xigga. Winooski waxaa soo gaalay soo jeedin ay saxiixeen 5 boqolkiiba codbixiyaasheedu oo ay ku dalbanayaan in isbadel la sameeyo kaasoo awood u siinaaya Dawlada Hoose ee Magaallada Winooski qorista sharci ka difaacaya dadka kireysteyaasha ah guri ka saarida ayadoon loo amrin 'sabab cadaalad ah.' Arag soo jeedinta hoose.

Jadwalka Isbadelkaan Axdiga iyo haddii uu jiro Xeer



Cod kasta oo ah "maya" ayaa keenaaya in Sharciga Guri ka Saarida Cadaalada ah inuusan ka dhaqan gelin Winooski waqti xaadirkaan

Jadwalkani waxa kale oo laga yaabaa inuu u baahdo cod labaad ee magaaladu si loo ansixiyo habka

Haddii aad raadinayso adeegyada guriyaynta,
[booqo \[winooski.vt.gov/housing\]\(http://winooski.vt.gov/housing\)](http://booqo.winooski.vt.gov/housing)

Isbadelka axdiga ee codbixiyaashu soo jeediyeen kaasoo lagusoo dari doono Codaynta Maalinta Kulanka Magaallada ee 2023.

Qodobka 4

Haddii Axdiga Magaallada Winooski, oo Soo baxay 2013, Xeer Lambar M-9, sida la dhaqan gashay, lagu sameeyo isbadel dheeri ah si Dawlada Hoose loo siiyo awood ay ku abuurto qodobo ka difaacaaya dadka kireysteyaasha ah guri ka saarida ayadoo aan lahayn 'sabab cadaalad ah' ayadoo dhaqan gelisaysa kuna kordhinaysa qayb cusub 304(b)(13) oo sheegaysa sida soo socota:

"304(b)(13)(A) Bixinta xeerka difaacyada ee dadka kireysteyaasha guryaha xaafadaha ah, sida ku cad Cutubka 137 ee Title 9 ee Sharciyada Vermont, kuwaasoo ka difaacaaya guri ka saarida ayadoon lahayn 'sabab cadaalad ah,' markaas oo sababta cadaalada ah ay ku jiraan, laakiin kuma koobna:

- (1) burinta waraaqaha qoran ee heshiiska kirada kiraystaha,
- (2) jebinta axdiga kiraystaha ee gobalka ee maamulaaya waajibaadka kirayntaha ku jira heshiisyada kirada ee guryaha xaafada ah,
- (3) bixin la'aanta lacagta kirada, iyo
- (4) ku fashilmida kireystuhu ku fashilmo inuu aqballo shuruudaha cusbooneysiinta heshiiska oo qoraal ah, macquul ah kuna salaysan daacadnimada.

(B) Xeerka noocaas ah ayaa ka reebaaya 'sababta cadaalada ah' dhammaadka mudada heshiiska kirada oo ah sababta keliya oo loo dalbanaayo joojinta kirada. Marka lagasoo tago shardi dhaafyada ku qoran Cutubka 137, Title 9, xeerka ayaa ka reebaaya qodobkaan, kaasoo ku jiri kara qodobada dhexdhexaadinta, kireysteyaasha qolalka guri gaar ah ama qayb kamid ah guri iyo sidoo kale guryaha soo socda laakiin kuma koobna:

- (1) guriga labo, iyo sadex dabaqlaha ah ee uu dagan yahay mulkiiluhu;
- (2) guryaha la joojiyay kirayntooda, ayna ku jiraan guryaha uu dagaayo mulkiiluhu ama xubnaha u dhow-dhow ee qoyska oo ah dadka rasmiyan u dagaaya; iyo
- (3) guryaha u baahan dayactirka wayn oo meesha ka saaraaya in la daganaado.

(C) Xeerka noocaas ah waxaa ku jiraaya qodobada:

- (1) yaraynaaya saamaynada xun ee ku dhici kara kireysteyaasha iyo mulkiileyaasha guryaha, ayna ku jirto laakiin kuma koobna shuruudaha bixinta ogeysiis ku filan iyo qarashaadka macquulka ah ee guurista,
- (2) bixinta muddo diyaar garoow oo macquul ah kadib marka qofku daganaa, iyo
- (3) yaraynta kordhinnada aan macquulka ahayn ee kirada si looga hortago guri ka saarida duruuftu keenayso ama inaan qofka loo cusbooneysiin heshiiska, inkastoo ay tahay inaan arintaani keenin in kirooyinka lagu xadido wax ka badan ka hortago guri ka saarida gaarka ah.

(D) Xeerku waa inuu qeexaa waxa laga wado 'ogeysiis macquul ah' oo 'ku filan' marka la qeexaayo sababta cadaalada ah waana inuu ka doonaa mulkiileyaasha guryaha inay ogaysiiska sababta cadaalada ah iyo shuruudaha kale ee sharciga siiyaan kuwaasoo qayb ka ah heshiiska kirada."?